# Waa maxay caraarshowga B?

**Cagaarshowga B waa fayras ku nool beerkaaga. Malaayiin dad ee daafaha dunida ayaa la nool.**

Wuxuu ku gudbaa dhiiga iyo dhacaanada jirka, tusaale ahaan inta lagu jiro dhalmada. Dadka badankood wuxuu ku dhacaa fayraska markii ay dhashaan ama sida canug yar ahaan.

Caabuqyada muddada dheer ayaa u hogaamin karo cudurka beerka halista ah (cagaarshow) ama kansarka beerka. Laakiin dadka badankood way ku caafimaadanyihiin cagaarshowga B.

Ma jiraan wax daaweyn ah weli. Fayraska waxaa xakameyn kara habka difaacaaga ama daawaynta. Xakameynta ayaa ka caawiso joojinta waxyeelada daran.

Dadka halista ugu jiro cagaarshowga B waxay heli karaan tallaal bilaash ah si ay uga illaaliso.



**"Waa laygа baaray canug ahaan oo runtii ma fahmin illaa aan ka weynaado.**

**Hadda wuxuu iigu dhacay waqti la qaadashada carruurteyda, socodka maalin walba, iyo kala hadlida dadka aan ku kalsoonahay."**

## Warbixinta iyo taageerada laguugu tallogalay

Waa caadi inaad su'aalo qabtid ama aad u baahantahay taageero yar.

**British Liver Trust adiga ayay halkaan kuu joogaan.**



Si aad ula hadashid qof ku fahamsan, ka soo wac qadka **BILAASHK** ee kaalisada British Liver Trust ee **0800 652 7330**.

Waxaan haynaa warbixin badan oo ku saabsan cagaarshowga B. Waxaad sidoo kale ku soo biiri kartaa Kooxda Taageerada ama Bulshadeena Onleenka.

Si aad wax badan u ogaatid sawir koodhka ama booqo britishlivertrust.org.uk/translate-hepb

Buug-yaraha waxaa la sameeyay Nofeembar 2023.
Koodhka: HBV/11/23.

British Liver Trust waa Samafal ka Diiwaangashan Ingiriiska iyo Wales 298858, Scotland SC042140.

BRITISH LIVER TRUST

NHS

Somali Soomaali



# Kaliya iska baar cagaarshowga B

## Waxa aad u baahan tahay inaad ogaato

Waxaad ka heleysaa balan dhaqtarka taqasuska ama kaalisada oo ku saabsan baaritaankaaga.

Waxaa laga yaabaa inaad sugtid dhowr bilood. Aad ayay muhiim u tahay in la aado, xattaa haddii aad dareentid fiicnaan.

Buug yarahaan wuxuu halkaan u yaalaa inuu ku caawiyo adoo sugayo. Wuxuu kuu sheegaa wax ku saabsan:

- Waxa cagaarshowga B yahay
- Waxa dhaco marka xigta
- Illaalinta dadka kale
- Daryeelida caafimaadkaaga
- Meesha loo aado warbixin badan iyo taageero

## Waxa dhaco marka xigta?

Waxaad u baahantahay inaad ku aragtid taqasus isbitaalka. Waxaad laga yaabaa inaad sugtid dhowr bilood. Isku day inaadan walbahaarin. Sameyso liis su'aalo ah ee aad horay u qaadatid. Waad weydiin kartaa turjubaan haddii aad mid u baahantahay.

Khabiirku waxa uu samayn doonaa baadhitaano ay ka mid yihiin baadhista dhiiga iyo baadhista beerka si uu u eego:

- Sida firfircoon oo uu fayraska yahay
- Haddii beerkaaga ay waxyeelo soo gaartay
- Haddii aad u baahantahay in lagu daaweeyo

Ku haynta heerka fayraska meel hoose waxay joojisaa waxyeelida beerkaaga. Xaaladaha intooda badan, nidaamkaaga difaaca ayaa midaan sameyn karo. Dadka qaar waxay u baahanyihiin daaweyn, taasoo caadi ahaan ah kaniin aad qaadatid maalin walba.

Waa muhiim in la aado dhammaan balamahaaga iyo baaritaanada. Xattaa haddii aad dareentid fiicnaan ama aadan ku jirin daaweyn. Fayraska wuxuu noqon karaa mid aad u firfircoon oo wuxuu waxyeelaa beerkaaga adoonan ogaanin.

**Natiijooyinka baaritaankaaga waa qarsoodi. Ma saameyso fursada lagu sheegto magangalyada ama lagu dajiyo sheegashada socdaalka.**

## Illaalinta dadka kale

Dadka kuu dhow ayaa sidoo kale ku dhici karo cagaarshowga B. Ama waxaa laga yaabaa inay horaan u qabaan. Tan ayaa ka mid ah:

- Dadka ku nool gurigaaga, oo ay ku jiraan carruurta
- Dadka aad galmo la leedahay

Waxaad ka caawin kartaa daryeelidooda adoo kala hadlayo natiijooyinka baaritaankaaga. Waxaad tusin kartaa buug yarahaan si ay kaaga caawiso sharaxaada.

Dadka kuu dhow waa inay weydiiyaan Dhaqtarkooda Qoyska (GP) **baaritaan bilaash ah oo cagaarshowga B** si loo hubiyo inaysan qabin. Waxay sidoo kale heli karaan **tallaal bilaash ah, badqab ah** oo aad ugu wanaagsan illaalinta dadka cagaarshowga B.

Waa bilaash in la iska diiwaangeliyo Dhaqtarka Qoyska (GP).
Booqo www.nhs.uk/service-search/find-a-gp si aad u heshid mid kuu dhow.

Cagaarshowga B wuxuu ku gudbaa markii dhiiga ama dhacaanka jirka ee dadka isku darsamaan. Taasoo ka dhigan inuusan ku gudbi karin sameynta ama wadaagida cuntada, habsiinta, ama shumiska.

Gacan ayaad ka geysan kartaa joojinta fayraska inuu ku gudbo.

- Isticmaal kondhom ama xadeyn si aad galmo u sameysid, illaamaa lamaanahaaga uu si buuxdo u tallaalanyahay ama sidoo kale uu la noolyahay cagaarshowga B.
- Hala wadaagin wax gaari karo dhiig sida sakiimo, buraashka ilkaha, cirbadaha.
- Ku dabool jeexyada, xoqida iyo dhaawacyada balasta oo ku nadiifi daadashada dhiiga biyaha baliijka.

## Daryeelida caafimaadkaaga

Waxaad fiirin kartaa waxyaabaha laga daryeelo caafimaadkaaga hadda, adoo sugayo balantaada.

- Cun cunto caafimaadan
- Ha cabin alkulo
- Noqo qof firfircoon oo jimicsi samee
- Qaado hurdo badan
- Aad dhammaan baaritaanadaada
- Marwalba u sheeg xirfadlayaasha caafimaadka inaad qaadatay baaritaanka cagaarshowga fiican ee B, marka waxay fiirin karaan daawada badqabka kuu ah inaad qaadatid

Daryeel caafimaadka damiirkaaga sidoo kale. La hadlida dadka ayaa kaa caawin karta. Ka fakar wax ku saabsan cida aad aaminsantahay oo halkaas ka bilow. British Liver Trust waxay leeyihiin Kooxo Taageero halkaaso aad kula kulmi kartid dad kale oo la nool cagaarshowga B.

Cagaarshowga B ayaa badanaa sababin wax aastaamo ah. Waxaad dareemi kartaa sida inaad qabtid samboor fudud ama ogaataa cuncun yar. Wixii caawinta maareynta aastaamahaan, la hadal Dhaqtarkaaga Guud (GP) ee qaliinka ama farmashiga.

**Cagaarshowga B wuxuu keeni karaa dhibaatooyin halis ah. Haddii aad qabtid kuwa ka mid ah aastaamahaan aad A&E:**

- Dareemeysid daal daran
- Maqaar ama indhaha jaalaha ah (cagaarshow)
- Calool bararsan
- Matagida dhiig ama madow, sida saxaro

Soo wac qadka **BILAASHKA** ee kaalisada British Liver Trust **0800 652 7330.**